OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

# Sharuudaha Deeqda 2026 ee Xarunta Dhexe ee Farshaxanka & Sinnaanta Jinsiga

## Dulmarka Deeqaha

Xarunta Farshaxanka & Sinnaanta Jinsiyadaha waa barnaamijka Xafiiska Fanka & Dhaqanka Seattle si uu u taageero ururada fanka iyo dhaqanka Seattle. Barnaamijkan waxa loo qorsheeyay in lagu dhiirigaliyo ururadaas in ay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan sidii loo heli lahaa hab deegaan faneed oo loo siman yahay. Farshaxanka, dhaqanka, hidaha, iyo ururada adeegga farshaxanka ee leh ugu yaraan saddex sano oo barnaamijyo ah oo la siinayo dadweynaha Seattle ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan. Waxaan mudnaanta siinnaa taageeridda ururada Seattle ee sida fir-fircoon uga shaqeeya in ay xuddun u noqdaan qiyamka loo dhan yahay, ka-hortagga cunsuriyadda, oo aadanaha ahmiyad siiya.

**Wixii macluumaad ah iyo kaalmaynta codsiga, u-qalmitaanka ama taageerada farsamada ee khadka tooska ah** kala xidhiidh Kathy Hsieh, Istaraatiijiyadda Maalgelinta Dhaqanka, lambarka (206) 733-9926 ama kathy.hsieh@seattle.gov .

**Waxaan haynaa tarjubaano kugula hadli kara luqadaada, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerikaanka.** Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan heleyno turjumaan si uu ugu so biiro wicitaanka.

## Codsiga

Ku codso khadka: https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new

Hadii aadan haysan kumbuyuutar ama khad internet, la xiriir shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan.

## Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

### Talaado, Agoosto 5, 2025, 5:00 galabnimo Pacific

Fadlan u ogolow wakhti ku filan oo aad ku buuxiso codsigaga. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib 5 pm (Pacific) waqtiga kama dambaysta ah lama aqbali doono.

## U-qalmitaanka

Hay'adaha farshaxanka, dhaqanka, hidaha, iyo adeegga farshaxanka ayaa u-qalma haddii:

- Xaruntaada koowaad ay ku taallo gudaha xadka magaalada Seattle

- Aad leedahay hadaf fan iyo dhaqameed, barnaamijyo, ama waxaad tahay urur dhaqan gaar ah oo leh farshaxan iyo barnaamijyo dhaqameed oo muhiim ah
- Aad leedahay ugu yaraan saddex sano oo taariikh ah oo aad ku bixiso faa'iido dadweyne xagga farshaxanka iyo dhaqanka ee dadwenaha Seattle
- Aad haysato nambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Federaalka, inkasta oo aan lagaa rabin inaad haysato 501(c)(3).
- Waxaad leedahay ballanqaad iyo ficilo waafaqsan inaad tahay urur ka soo horjeeda cunsuriyadda iyadoo loo marayo aragtiyada kala-duwan
- Ma haysatid wax maalgalin ah oo isku mid ah iyada oo loo marayo deeqdayada barnaamijta smART

## Maalgelinta

Abaalmarintu waxay ku salaysan tahay dhibcaha guud waxaana qiimaynaya guddi bulsho oo kala duwan. Cabbirka miisaaniyadda ururkaagu maaha arrin lagu go'aaminayo qaddarka abaalmarintaada. Hadafka barnaamijku waa in si guud loo maalgeliyo halkii si qoto dheer loo maalgelin lahaa. Qiyaasta maalgelinta ayaa la filayaa inay u dhexeyso **$500 ilaa $18,000 sanad kasta** oo maalgelinta la helo.

Heerarka abaal-marintu way kala duwanaan karaan sanadba sanadka ka dambeeya lamana dammaanad qaadayo dakhliga cashuuraha Magaalada iyo habka miisaaniyada awgood. Waqtigaan, iyadoo ku saleysan saadaasha miisaaniyada Magaalada, maalgelintu waxay bilaaban doontaa 2026 laakiin ma dammaanad qaadi karno in maalgelin ah saddex sano oo buuxda in lagu bixin doono wareeggaan codsiga.

## Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Ku biir aqoon-is-weydaarsi khadka fogaanta ah si aad wax badan uga ogaato deeqdan iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican. Saacadda ugu horreysa ee aqoon-is-weydaarsi kasta waxa ay diiradda saari doontaa codsashada deeqaha Farshaxanka Xarunta & Sinnaanta Jinsiyada. Haddii aad xiisaynayso inaad sidoo kale wax ka ogaato deeqda Cultural Facilities Fund, waa inaad qorsheysaa inaad joogtid 90-ka daqiiqo oo buuxda.

**Aqoon isweydaarsi 1**
Khamiis, Meey 29, 2025, laga bilaabo 10:30 subaxnimo-12:00 galabnimo duhurnimada Pacific
Ku soo jawaab 5/29

**Aqoon isweydaarsi 2 ASL-tarjumaya**
Isniin, Juun 2, 2025, laga bilaabo 2:30-4:00 galabnimo Pacific
Ku  soo jawaab 6/2

**Aqoon isweydaarsi 3**
Talaado, Juun 24, 2025, laga bilaabo 12:00-1:30 galabnimo Pacific
Ku soo jawaab 6/24

**Aqoon isweydaarsi 4**
Arbacada, Luulyo 9, 2025, laga bilaabo 1:00-2:30 galabnimo Pacific
[Ku soo jawaab 7/9]